Stockholms stad

Somaliska

Waxa dib loo eegay May 2017

Qofka bilaabaaya inuu barto sfi-da

waxbarashada Swiidhishka loo dhigo dadka ajaanibka ah

Sfi waa koorso swiidhishka oo bilow ah. Hadafku waxa weeye inaad shaqo bilowdo ama aad waxbarashada sii wadato. Waxaad waxbarashada ka danbeysa Sfi-da iyo fursadaha shaqada kala hadli kartaa la taliyayaasha ardeyda kala taliya waxbarashada iyo xirfadaha.

Sidan ayay u dhacaysaa waxbarashada sfi-du
Sfi-du waxay ka kooban tahay **saddex dariiq** oo waxbarasha (1-3) waxaana jira afar **koorsooyin** (A-D). Markaad gaadho hadafka koorsada ayaad heli doontaa shahaado. Sfi-da ka dib ayaad ka sii wadi kartaa inaad komvux dhigato.

Si aad u ogaato koorsada lagu geynaayo, ayaad sameyn doontaa **imtaxaan lagu qiimeynaayo luqadaada** iyo wareysi yar oo xarunta Sfi-da ka dhacaaya. Kadibna waxaad dooran doontaa dugsiga ay meeli ka banaan tahay. Booqashadaada waxa laga yaabaa inay qaadato 30 daqiiqo (minuter) illaa 3 saacadood cinwaanka waa **Vuxenutbildningscentrum**, Rosenlundsgatan 52. Markaa kadib ayaa warqad laguugu yeedhaayo guriga laguugu soo diri. Laga bilaabo is diiwaan galinta ilaa bilowga koorsada aya caadi ahaan qaata dhowr todobaad. Sfi-da ayaa si joogto ah loo qaataa. Ardeydu waxay bilaabaan oo ay dhameeyaan xiliyo kala duwan oo xiliga waxbarashada ah. Waxbarashada iyo buugaagta koorsadaduba waa bilaash.

Koorso kastaa waxay bilowga leedahay **hordhac.** Markaas ayaa heli doontaa macluumaad ku sabsan koorsada iyo dugsiga. Waxaad sidoo kale macalinkaaga ka wada hadlaysaan hadafka waxbarashadaada. Waxay idin sameyn doonaan qorshe waxbarasho oo adiga ku gaar ah iyadoo aad go'aansan doontaan intaad koorsad dhigan doonto. Haddii aanad haysan fursad aad ku timaado todobaadka ugu horeeya ayaad lumineysaa qorshahaaga waxbarashada. Xiliga koorsadu socoto ayaa wadajir dugsiga ula badali kartaa qorshaha waxbarashada haddii loo baahdo. Waxaad dhaemynaysaa koorsada iyadoo aad sameyn doonto imtaxaan (Imtaxaan qaranka oo ay soo saarto hay'ada Dugsiyada) marka uu macalinkaagu u arko inaad heerkii iyo wixii la iskaga baahnaa soo gaadhay.

Manhajka sfi-da waxa laga helayaa: **skolverket.se**

Qof kastaa waxa uu koorsad ku hadlaa Swiidhish, marka laga bilaabo maalinta ugu horeysa. Macalinku waxa uu waxbarashada ku wadaa Swiidhish. Waxaad ku jiri doontaan fasal, hoolka kambiyuuterka iyadoo aad booqashooyin waxbarasho oo dugsiga ka baxsan ku aadi doontaan tusaale ahaan goobaha shaqada iyo masxafyada. Waxbarashada ayaad isticmaalin doontaan buugaag, joornaalo, warbaahinta bulshada, barnaamijyada luqadaha iyo taableedyo iwm.

Vuxenutbildningscentrum
Rosenlundsgatan 52
Tel: 08-508 35 450
Epost: sfi@stockholm.se
Webb: **stockholm.se/sfi**

Waxay masuuliyad kaa saaran tahay adiga waxbarashadaada iyadoo ay muhiim tahay inaad ilaaliso wakhtiga dugsiga. Waxa kale oo muhiim ah inaad firfircoon tahay, inaad soo sameyso layligaaga oo aad guriga ku soo celceliso waxaad dugsiga ku soo baratey.

Haddii aad ku khasban tahay inaad dugsiga ka baaqato ayay wanaagsan tahay inaad macalinkaaga taas u sheegto. Haddii aad wax ka badan 14 maalmood oo isku xiga ka maqan tahay ayaad lumineysaa qorshahaagi koorsada. Haddii aad doonayso inaad dib u bilowdo waxbarashadaadii ayaad la xidhiidhaysaa dugsigii ugu danbeeyey ee aad dhigan jirtey. Haddii aad ka maqan tahay wax ka badan 6 bilood, ayaad la xidhiidhaysaa xarunta **Vuxenutbildningscentrum**, Rosenlundsgatan 52,. Haddii aad doonayso inaad badasho dugsiga ayaad la xidhiidhaysaa xarunta **Vuxenutbildningscentrum**. Laakiin dugsiga ma badali kartid haddii aad ku jirto koorsada xagii ugu danbeysay.

Sfi-da waxa ka qeyb qaadanaaya dumar iyo rag ka kala yimid dunida oo dhan oo leh dhaqamo iyo diimo kala duwan. Waxa muhiim ah in la is ixtiraamo oo dadka kale laga fikiro. Iskudey inaad isticmaasho luqada Swiidhishka sida ugu badan ee suurtogalka ah!

Waxyaalaha dheeraadka ah
Qofka ka weyn 16 sanno, ee ku qoran Stockholm, ee haysta lambarka shakhsiga oo buuxa ee u baahan inuu barto Swiidhishka herka sfi-da ayaa xaq u leh inuu sfi-da Stockholm wax ka barto. Haddii aad tahay muwaadin EU/EES ka soo jeeda ama muwaadin u dhashay Switzerland waa inaad haysataa deganaansho oo aad walibana degan tahay Stockholm.

A-kassa
Haddii aad haysato a-kassa oo aad rabto inaad sfi-da qaadato waa inaad marka hore la xidhiidhaa a-kassa daada (dalbato cadeyn waxbarasho/**studieförsäkran**). Dalbo xili wanaagsan oo sug go'aanka ka soo baxa a-kassan ka hor inta aanad bilaabin waxbarashada.

Sida waafaqsan **Pul** (**Personuppgiftslagen**) ayay Arbetsmarknadsnämnden oo ka ah masuul macluumaadka shakhsiga ay maaryenaysaa macluumaadka looga baahan yahay si loo bixiyo waxbarasho. Macluumaadka waxa loo soo gudbin karaa dugsiga ay khuseyso. Waxaad xaq u leedahay inaad hal mar sanadkii dalbato nuqul sheegaaya macluumaadkaaga meesha ku qoran. Dalabka nuqulka waa inuu ahaado qoraal saxeexaaga wata, kaas oo loo diraayo **Vuxenutbildningscentrum**. Haddii macluumaad qalad ahi ku dhigan yihiin ayaad xaq u leedahay inad dalbato sixitaan.

Haddii aad fikrado ka qabto waxbarashada ama waxyaalo kale oo dugiga ku sabsan ayaad taas u sheegaysaa macalinkaaga ama waxaad la xidhiidhaysa cida waxbarashada masuulka ka ah/maamulaha dugsiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku sabsan waxqabadka ama sida fikradaada looga dhiibto ama cabasho loo sameeyo waxbarashada, tag bogga **stockholm.se/sfi**

Vuxenutbildningscentrum
Rosenlundsgatan 52
Tel: 08-508 35 450
Epost: sfi@stockholm.se
Webb: **stockholm.se/sfi**